




HESHIISKA HANNAANKA FEDARAALAYNTA GARSOORKA

GOLAHA WADATASHIGA QARAN

Taariikh: 28 December, 2022

GOLAHA WADATASHIGA QARAN (GWQ):

- Markuu Tixraacay:** Warmurtiyeedka iyo Jadwal hawleedka Shirkii Golaha Wadatashiga Qaranka ee 31 October, 2022;
- Markuu Arkay:** Cutubka 9aad ee Dastuurka KMG;
- Markuu Arkay:** Qodobbada 50-52 iyo 54aad ee Dastuurka KMG;
- Markuu Garwaaqsaday:** Baahinta adeegga caddaaladda loo qabo si kor loogu qaado kalsoonida shacabka Soomaaliyeed ay ku qabaan nidaamka Garsoorka;
- Markuu Ka Baarandagay:** Xaaladda Garsoorka Dalka;
- Markuu Xeeriyey:** Baahida muwaadiniinta Soomaaliyeed ay u qabaan helidda garsoor madaxbannaan, hufan oo lagu kalsoonaan karo;
- Markuu garowsaday:** Dhismaha Garsoor Federaal ah oo ay Soomaaliya yeelato;
- Markuu Tixgeliyey:** Muhimmada ay leedahay in Dalku yeesho hannaan caddaaladeed oo isku xiran, fududeenayana baahinta adeegga garsoorka.

WUXUU GO'AAMIYEY QODOBBADA SOO SOCDA:

1.0. Hannaanka Garsoorka

Nidaamka Garsoorka Dalku wuxuu noqonayaa hannaanka isku-dhafka oo ah mid isku xiraya garsoorka Dalka.

2.0. Mabaadi'da Guud ee Garsoorka

- 2.1. Garsoorku waxa uu ka madax-bannaan yahay laamaha Dawladda ee xeer-dejinta iyo fulinta markasta iyo marka uu gudanayo xilkiisaba.
- 2.2. Garsooreyaashu waxa ay u hoggaansamayaan oo keliya sharciga, waxayna u fulinayaan si dhax-dhaxaad, cabsi la'aan, eex la'aan ah, cid gaar ahna aan loogu daneynayn.
- 2.3. Go'aannada ka soo baxa maxkamadaha waa in ay u hogaansamaan dhammaan dadka iyo hay'adaha lagu soo saaray.
- 2.4. Xubnaha hay'adaha garsoorka laguma oogi karo dacwad ciqaab ama madani ah oo ka dhalatay fal la xiriira gudashada xilkiisa garsoorannimo.
- 2.5. Xubin ka tirsan garsoorka lama xiri karo, lagumana oogi karo dacwad ciqaabeed, lama baari karo oogadiisa ama hoygiisa, lamana basaasi karo, iyadoo aan ogolaansho laga haysan Golaha Sare ee Garsoorka haddii aan lagu qaban isaga oo faraha kula jira dembi ka dhigeya khasab xiritaankiisa.

3.0. Qaab-dhismeedka Maxkamadaha Dalka

- 3.1. Qaab-dhismeedka Maxkamadaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa sida soo socota:
 - (b) Maxkamadaha Darajada Kowaad;
 - (t) Maxkamadaha Racfaanka Dawladaha Xubnaha Ka ah DFS(DXDF);
 - (j) Maxkamadda Sare ee Dawladaha Xubnaha Ka ah DFS(DXDF);
 - (x) Maxkamadda Sare ee Federaalka oo xarunteedu tahay Muqdisho; iyo
 - (kh) Maxkamad Dastuur oo hal ah, xarunteeduna tahay Muqdisho.
- 3.2. Hannaanka Garsoorka Caasimaddu wuxuu yeelanayaa hadba maqaamka ay yeelato Caasimadda JFS.

4.0. Xeerka Nidaamka Garsoorka

Waxaa jiraya hal xeer nidaam garsoor oo nidaaminaya qaab-dhismeedka, xuduudaha, darajooyinka iyo awoodaha maxkamadaha iyo xeer-ilaalinta heer federaal iyo Dawladaha Xubnaha ka ah DFS.

5.0. Golaha Sare ee Garsoorka

5.1. Waxaa jiraya hal gole oo ah Golaha Sare ee Garsoorka oo ka kooban xubnaha soo socda:

- a) Guddomiyaha Maxkamadda Sare;
- b) Guddomiyaha Maxkamadda Dastuurka;
- c) Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka;
- d) Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Sare Dawladaha Xubnaha ka ah DFS;
- e) Xeer-ilaaliyeyaasha Guud ee Dowlada Xubnaha ka ah DFS;
- f) Qofka ugu sarreeya Maxkamadaha Caasimadda iyo Xeer-ilaaliyaha Caasimadda (iyadoo loo eegayo hadba maqaamka ay yeelato caasimadda JFS);
- g) Xubin ka tirsan Guddiga Xuquuqul Insaanka oo uu soojeedinayo magaciisa Wasiirka Caddaaladda XFS si uu Golaha Wasiirada XFS u ansixiyo;
- h) Seddex Qareen Sare oo ka imaanaya Ururka Qareennada Soomaaliyeed, xilkana haynaya muddo 5 sano;
- i) Seddex Xubnood oo ku xeel-dheer Sharciga oo haysta Shahaado Jaamacadeed, leh khibrad muddo aan ka yarayn 10 sano, xilkana haynaya muddo 5 sano ah.

5.2. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee federaalka ayaa noqonaya Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka, waxaana ku-xigeen u noqonaya Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka.

5.3. Waajibaadka iyo xilalka Golaha Sare ee Garsoorka waxaa ka mid ah:

- a) Ilaalinta madax-bannaanida, dhex-dhexaadnimada, hufnaanta iyo horumarinta garsoorka.

- b) Soojeedinta magacaabista, xil ka qaadista, baddelidda, dallacsiinta, iyo go'aan ka gaarista anshax-marinta, xuquuqda, howlgabnimada iyo horumarinta xubnaha garsoorka iyo.
- c) Tixgelinta cabashooyinka dadweynaha ayada oo la qaadayo tallaabooyinka ku habboon, si kor loogu qaado kalsoonida ay ku qabaan garsoorka.
- d) Nidaaminta habsami-u-socodka hawlaha garsoorka, hagaajinta xaaladaha shaqada iyo daryeelka hawl-wadeennada garsoorka.
- e) Maareynta maamulka iyo maaliyadda garsoorka.
- f) Casriyaynta hab-maamulka hay'adaha garsoorka.
- g) La xisaabtanka, qiimeynta iyo korjoogteynta xil-gudashada hay'adaha garsoorka ee dhammaan heerarka dawladda, iyo
- h) Waajibaadka kale ee ku xusan Dastuurka Federaalka Soomaaliya, Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo xeer-hoosaadka Golaha Sare ee Garsoorka.

6.0. Awoodaha Maxkamadaha

6.1. Awoodaha Maxkamdda Dastuurka:

Maxkamadda Dastuurka waxa ay awood u leedahay:

- I. Fasiraada dastuurka federaalka, dastuurada DAWLADAHA XUBNAHA KA AH DFS iyo xeerarka kale ee Dalka.
- II. Go'aan ka gaarista khilaafaadka la xiriira awoodaha dastuuriga ee u dhexeeya:
 - a. hay'adaha Federaalka dhexdooda,
 - b. hay'adaha federaalka iyo kuwo DAWLADAHA XUBNAHA KA AH DFS, iyo
 - c. hay'adaha DXDF dhexdooda.
- III. Go'aan ka gaarista in dastuurrada, xeerarka iyo heshiisyada caalamiga ah ay waafaqsanyihiin Dastuurka.
- IV. Dhagaysiga iyo go'aan ka gaarista saldhigga sharci ee eedaymaha Madaxweynaha JFS.

- V. Go'aan ka gaaridda xadgudubyada xuquuqaha iyo xorriyadaha dastuurka ee muwaadinka.
- VI. Go'aan ka gaaridda dacwadaha la xiriira Dastuurka ee looga soo gudbiyey maxkamadaha kale.
- VII. Go'aan ka gaaridda khilaafaadka ka dhasha doorashooyinka heerarka kala duwan ee Dawladda, iyo
- VIII. Awoodaha kale ee ku xusan Dastuurka Federaalka Soomaaliya, Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo xeerarka kale.

6.2. Awoodaha Maxkamadda Sare ee Federaalka:

Maxkamadda Sare ee Federaalka oo ah Maxkamadda ugu sarreysa dalka waxa ay awood u leedahay:

- I. Racfaannada laga soo qaato go'aannada maxkamadaha sare ee DXDF ee la xiriira dacwadaha Federaalka iyo xaaladaha kale ee gaarka ah ee lagu sheegay xeerarka kale.
- II. Dacwadaha la xiriira khilaafka awoodeed ee ka dhex dhaca labo ama ka badan DXDF maxkamadahooda.
- III. Dib-u-eggidda dacwadaha la xiriira go'aannada maamul ee kama dambaysta ah ee hay'adaha Federaalka, iyo
- IV. Awoodah kale ee ku xusan Dastuurka Federaalka Soomaaliya, Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo xeerarka kale.

6.3. Awoodaha Maxkamadda Sare ee DXDF:

6.3.1. Maxkamadda Sare ee DXDF waxa ay awood u leedahay:

- I. Racfaannada laga soo qaato:
 - a) go'aannada maxkamadaha racfaanada DXDF ee dacwadaha DXDF,
 - b) go'aanadda maxkamdaha darajada kowaad ee dacwadaha federaalka.
- II. Go'aannada maamul ee kama dambaysta ah ee hay'adaha DXDF.
- III. Dacwadaha la xiriira khilaafka awoodeed ee ka dhex dhaca maxkamadaha hoose ee DXDF.

IV. Awoodaha kale ee ku xusan Dastuurka Federaalka Soomaaliya, dastuurrada DXDF, Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo xeerarka kale.

6.3.2. Dacwadaha DXDF waa in ay ku dhammaadaan Maxkamadda Sare ee DXDF.

6.4. **Awoodaha Maxkamadda Racfaanka ee DXDF:**

Maxkamadda Racfaanka ee DXDF waxa ay awood u leedahay dhegaysiga racfaannada go'aannada dacwadaha DXDF ee Maxkamadda Darajada kowaad oo kaliya.

6.5. **Awoodaha Maxkamadda Darajada kowaad:**

Maxkamadda Darajada kowaad waxa ay awood u leedahay dhegaysiga dhammaan dacwadaha federaalka ah iyo kuwo DXDF ee lagu sheegay xeerarka.

7.0. Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka

7.1. Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka wuxuu qeyb ka yahay garsoorka.

7.2. Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka wuxuu u madax-bannaan yahay hawlaha xafiiskiisa iyo maamulkiisa, wuxuuna hagayaa isla markaasna dhaqaajinayaa dacwadadah cigaabta ee federaalka ee awoodda uu u leeyahay.

7.3. Xafiiska xeer -ilaaliyaha Guud ee DXDF wuxuu u mada-bannaan yahay hawlaha xafiiskiisa iyo maamulkiisa, wuxuuna hagayaa isla markaasna dhaqaajinaya dhamaan dacwadaha cigaabta ah ee DXDF ee awoodda u leeyahay.

7.4. Qaab-dhismeedka Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka waa:

- I. Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo wakiilada Xeer-ilaaliyaha;
- II. Xeer-ilaaliyaha Guud ee DXDF iyo wakiilada xeer-ilaaliyaha.

8.0. Habraaca Magacaabista

Habraaca Magacaabista Xubnaha Hay'adaha Garsoorka waa:

- I. Dhammaan Garsooreyaasha iyo xeer-ilaaliyeyaasha labada heer oo ay ku jiraan kuwo Maxkamadda Dastuurka iyo Maxkamadaha sare ee DFS iyo

DXDF waxaa soo jeedinaya magacaabistooda Golaha Sare ee Garsoorka, waxaana xeer ku soo saaraya hadba heerka madaxweyne ay khusayso.

- II. Dhammaan Xubnaha Golaha Sare ee Garsoorka waxaa xeer ku soo saaraya Madaxweynaha JFS.
- III. Xubnaha aan ku imaanayn xafiiska, Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda XFS ayaa soo jeedinaya magacyadooda si uu Golaha Wasiirada XFS u ansixiyo.

9.0. Dhaqaalaha Garsoorka

- 9.1. Garsoorku waa in uu leeyahay miisaaniyad u gaar ah oo u madax-bannaan yahay maamulkeeda si waafaqsan xeerarka maareynta Maaliyadda dalka.
- 9.2. Madaxda DFS iyo dawladaha xubnaha ka ah DFS waa in ay si buuxda u taageeraan madax-bannaanida maamul iyo maaliyadeed ee garsoorka.
- 9.3. Mas'uuliyadda maaliyadda Garsoorku waxa ay raacaysaa awoodaha hay'adaha Garsoorka ee loo kala asteeyey DFS iyo DXDF, waxaana go'aan looga gaarayaa heshiiska fadaraaleynta Maaliyadda Dalka.

10.0. Meel-marinta Heshiiskan

Mabaadi'da qodobbada Heshiiskan waxa ay galayaan Dastuurka JFS ee dib-u-eegista lagu samaynayo, marka laga reebo arrimaha lagu nidaamayo Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo xeerarka kale ee Dalka.